MAYO CLINIC
HEALTH SYSTEM

Xuquuqda & Mas'uuliyadda Bukaanka

Patient Rights & Responsibilities

Siistemka Caafimaadka Mayo Kliinik (Mayo Clinic Health System) waxay rabtaa in bukaan kasta uu helo daryeelka ugu fiican ee suurtogalka ah.Waxaan rabnaa in aad ogaatid iyo in aad fahamtid xuquuqdaada iyo mas'uuliyadda la xariirta daryeelkaada, takhtarkaada iyo kliinikada ama isbitaalka.

MAYO CLINIC
HEALTH SYSTEM

MAYO CLINIC HEALTH SYSTEM
mayoclinichealthsystem.org

©2014 Mayo Foundation for Medical Education and Research. All rights reserved. MAYO, MAYO CLINIC, Mayo Clinic Health System and the triple-shield Mayo logo are trademarks and service marks of MFMER.

Somali 5219 4/14

Xuquuqda bukaanka *Patient Rights*

Hoos waxaa ku qoran xuquuq cayiman.

Bukaan ahaan, Aniga, ama wakiilkeyga sharci ahaan loo fasaxay, waxaan xaq u leenahay:

- Aan helo daryeel aan takoor lahayn sida da, isir ka, jinsiyad da, diin ta, hidd aha, luqad da, itaal darrida jirka ama madaxa, xaaladda bulshada dhaqaalaha, xaaladda guurka, kacsiga, kacsiga qofka rabo, iyo aqoonsiga lab/dhedig ama fikradda uu qofka soo jeediyo.
- In aan dhakhso u sheego qoyskeyga iyo takhtarkeyga in ley seexiyay isbitaalka iyo in qoyskeyga ka qeybgalo go'aanada ku saabsan daryeelkeyga.
- In aan ogaado magaca takhtarka ama aqoonyaanka kale ee mas'uuliyadda kowaad ka saaran tahay daryeelkeyga, iyo in aan ogaado aqoonsiga iyo xaaladda aqoonta dadka aan ka helo daryeelka.
- In aan takhtarkeyga iyo shaqaalaha ka helo, leyguna sheego erayo aan fahmi karo, macluumaadka iminka jira iyo aqoonta ku saabsan waxa leygu sheego, daweynta, waxa rajadu tahay iyo adeegyada la bixiyo. Macluumaadka iminka jira waxaa ka mid ah natiijadaha aan la filayn oo ku saabsan daryeelka, daweeynta iyo adeegyada.
- In aan takhtarkeyga iyo shaqaalaha ka helo, marka laga reebo degdegga, macluumaad ii ogolaada in aan bixiyo ogolaasho xogogaal ah ka hor inta aan bilaabin hawl ama daweyn.
- In aan takhtarkeyga iyo shaqaalaha ka helo macluumaad iyo aqoon marka leyga saaro isbitaalka.
- In aan helo adeegyada degdegga, haddii aan isku arko calaamado darran oo in ku filan culus, taasoo carqalad gelin kartaa caafimaadkeyga, keeni karta itaal darri ku timaada xubnaha ama qeyb ka tirsan jirka.
- In aan codsado qof kor ka fiiriya ama jooga marka ley baaro.Qofka kor ka fiiriya wuxuu ahaan karaa shaqaale ka tirsan Siistemka Caafimaadka Kliinikada Mayo (Mayo Clinic Health System), xubin ka tirsan qoyska ama qof saaxiib la ah bukaanka.
- In aan ka qeybgalo qorsheynta daweynteyda caafimaadka iyo in aan diido in aan ka qeybgalo cilmi baarista tijaabada.
- In aan daryeel u helo calaamadaha ka jawaaba daweynta, xattaa haddii aysan xariir la lahayn xaaladeyda daryeelka caafimaadka aasaasiga.
- In aan qaato qiimeynta sii socota, macluumaad iyo maamul wax ka qabta xanuunka.
- In aan helo daryeel ku wanaagsan tixgelinta iyo xushmadda, iyo jawi ammaan iyo gaar ah oo ka madax banaan dayac, kadeed iyo ku xadgudub.
- In aan ka madax banaanahay celcelin qaab kasta oo caafimaad ahaan aan loo baahneyn ama loo isticmaalo khasab, dishibiliin, danta ku jirto ama aar gudashada shaqaalaha.
- In aan ka madax banaanahay isaruurin ama celcelin qaab kasta oo aan loo baahneyn xagga maamulka dabeecadda degdegga ama loo adeegsado khasab ahaan, dishibiliin, danta ku jirto ama aar gudashada shaqaalaha.
- In aan helo qiimeyn si ley siiyo adeegyada badbaadada
- In aan doorto qof aan ka helo taakuleyn oo aan ka helo taageero inta aan ku jiro isbitaalka ee magaceyga ku adeegsan kara xuquuqdeyda booqashada.Aniga ama qofka aan ka helo taageerada waxaan tilmaami karnaa qofka iigu yimaada booqasho iyo in aan la noqono ama diidno ogolaashadaas waqti kasta inta aan ku jiro isbitaalka.
- In aan helo daryeel iyo daweyn oo xushmad u haaysa waxa aan qiimeeyo, waxa aan aaminsanahay, iyo falsafada nolosha.
- In aan ka hadlo iyo in aan ka qeybgalo wadahadalada ku saabsan arrimaha asluubta ee ka soo baxa daryeelkeyga caafimaadka.In aan helo macluumaadka ku saabsan Guddiga Asluubta (Ethics Committee) marka aan dalbado.

Sii socota

Xuquuqda bukaanka *Patient Rights*

Sii socota

- In aan aniga iyo qoyskeyga helno taageerada caatifadda, hiddaha iyo niyadda.
- In aan dhamaystiro ama casriyeyo dardaarnka soo taxa waxa aan rabo xagga daryeelkeyga caafimaadka haddii aan awood u yeelan waayo in aan soo jeediyo waxa aan rabo.Siistemka Caafimaadka Kliinikada Mayo (Mayo Clinic Health System) waxay dhowri doontaa dardaaranka u hoggaansan sharciga.Dardaarankaan waxaa ku jira rabbitaankeyga ku saabsan deeqda xubinta ama hilibka jirka.
- In aan diido daweynta ilaa inta sharciga ogol yahay iyo in ley ogeysiiyo waxaa ka imaan kara talaabadaha aan qaado xagga caafimaadka.
- In ley ogeysiiyo baahida loo qaabo, laga doorto iyo ogolaashada hay'ad kale marka ku wareejinta hay'adaas la qorsheyay.
- In la asturo dhamaan isgaarsiinta iyo diiwaanka la xariira daryeelka caafimaadkeyga.
- In aan helo diiwaankeyga caafimaadka muddo macquul ah gudaheeda.
- In aan fiiriyo iyo in aan helo sharaxaad ku saabsan biilka iyadoo aan la fiirinin ilaha bixiya lacagta iyo in aan macluumaad ku saabsan kaalmada maaliyadda.
- In aan helo macluumaad ku saabsan xariirka Mayo Clinic Health System la leedahay daryeelka caafimaadka ama hay'adaha aqoonta ee ku lug leh daryeelkeyga.
- In aan helo tarjamada afka ee aqoonta u leh luqadaha iyo adeegyada tarjamada qoraalka, lacag la'aan.
- In aan soo gudbiyo cabbasho iyo in ley ogeysiiyo habka loo fiiriyo loogan hadlo cabbashada iyadoo aan laga cabsanin aar gudasho ama waxyeelo iga soo gaarta bixiyeheyga ama ururka.

Mas'uuliyadda Saaran Bukaanka *Patient Responsibilities*

Hoos waxaa ku qoran mas'uuliyad cayiman.

Bukaan ahaan, Aniga, ama wakiilkeyga sharci ahaan loo fasaxay, waxaan mas'uul ka nahay in aan:

- Si buuxdo uga qeybgalno daryeelkeyga, daweynta iyo aqoonta la xariirta ilaa inta suurtogalka ah, ee la xariira daryeelkeyga.
- Bixiyo macluumaad dhamaystiran oo ku saabsan xaaladda daryeelkeyga caafimaadka iyo taariikhda caafimaadka, soo sheego daryeelkeyga iyo halista caafimaadka sida aan u arko, iyo in aan weydiiyo su'aalo marka aan fahmin waxa leyga sheegay daryeelkeyga.
- U sheego bixiyeheyga daryeelka ama takhtarka isbaddalada ku dhaca xaaladeyda..
- U sheego bixiyeheyga ama takhtarka calaamadaha la xariira dhibatooyinka daryeelka caafimaadka, xattaa haddii aysan la xariirin xaaladeyda daryeelka caafimaadka aasaasiga.
- Soo sheego xanuunkeyga iyo in aan bixiyeheyga daryeelka iyo takhtarka kala qeybgalo soo saarka qorshaha maamulka xanuunka.
- U sheego bixiyeheyga daryeelka ama takhtarka haddii aan fahmin tilmaanta ama haddii aan awood u yeelan waayo in aan raaco.
- Ogolaado waxa ka yimaada falalka aan ku dhaqaaqo haddii aan doorto in aanan ka qeybgelin qorshaha daweynta lagu talliyay.
- Dhowro sharciyada ammaanka.
- In aan tixgeliyo bukaanka, qoysaska iyo shaqaalaha; kaalmo ka geysto kantaroolka qeylada iyo rabshada; iyo u hoggaansamo siyaasadaha cabbida sigaarka ee ururka.
- Handadin ama dhibaato gaarsiinin bukaanka, qoysaska ama shaqaalaha.
- Burburinin hantida bukaanka, qoysaska, shaqaalaha iyo dhismaha.
- Gutto waajibaadka maaliyadda ee daryeelkeyga caafimaadka sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah.
- La socdo in isbitaalka uu xad u yeeli karo ama xannibi karo xuquuqda aan u leeyahay booqashada sida hoos timaado xaaladaha qaar, kana mid ah balse ku ekeyn kuwa soo socdo:
  - Aniga waxaan qaataa faragelinta daryeelka
  - Waxaa jira arrimo la xariira kantaroolka cudurka
  - Waxaa jira carqaladeyn, handadaad ama dabeecad dagaal oo nooc kasta ah
  - Waxaan u baahanahay nasasho ama asturnaan

Habka Maamulka Ashtakada *Complaint Management Process*

Haddii aan ku guul dareysano in aan la kullano waxa aad filaysid, waxaan kugu soo dhaweyneynaa in aad nala wadaagtid arrimaha aad qabtid ee ku saabsan daweynta, ammaanka bukaanka iyo tayada daryeelka.. Waxaad soo jeedin kartaa arrimaha aad qabtid:

- Shaqaale kasta
- Bixiyehaada daryeelka ama takhtarka
- Agaasimaha kliinikada ama waaxda isbitaalka
- Waaxda Waxyaabaha uu la Kulmo Bukaanka (The Patient Experience Department)

Waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad islamarkiiba xallisid ashtakooyinka waqtiga lagu siiyo adeegga.Haddii ay kula tahay in arrimahaada/ashtakooyinkaada aan la xallinin ilaa aad ka qanacdid, waxaad bilaabi kartaa ashtako rasmi ah, kaddibna ogeysiiya Waaxda Waxyaabaha uu la Kulmo Bukaanka (Patient Experience), adiga oo u soo qora ama soo waca:

- **Patient Experience Department**
  1400 Bellinger St.
  P.O. Box 1510
  Eau Claire, WI 54702-1510
  715-838-5017 or 888-838-4777, khadka 85017
- **Patient Experience Department**
  2321 Stout Road
  Menomonie, WI 54751
  715-233-7781

Waxaa kula soo xariiri doono Waaxda Waxyaabaha uu la Kulmo Bukaanka (Patient Experience Department) si ay u aqoonsadaan in ay heleen ashatakadaada.Macluumaadka waxaa fiirin doono shaqaalaha gudaha, kaddibna waxaa laguu soo diri doonaa jawaab qoran muddo waqti macquul ah.Warqadda waxaa ku qornaan doono magaca qofka lagala xariiro isgaarsiinta iyo wararka mustaqbalka, kaddibna qofkaas wuxuu bixin doonaa jawaabta iyo xalka kaddib marka la dhamaystiro fiirinta.

Waxaad kaloo codsan kartaa liiska wakaaladaha ilaha laga soo qaado Waaxda Waxyaabaha uu la Kulmo Bukaanka (Patient Experience Department).Haddii aad dooratid in aad adeegsatid habkena ashtakada, ama haddii aadan awoodin in aad xallisid arrin (arrimo) ilaa aad ka qanacdid, waxaad kaloo xaq u leedahay in aad la xariirtid:

- **Centers for Medicaid and Medicare Services**
  7500 Security Blvd.
  Baltimore, MD 21244-1850
  877-267-2323
- **Wisconsin Division of Quality Assurance**
  One West Wilson St.
  P.O. Box 2969
  Madison, WI 53701-2969
  608-266-0224 or 800-642-6552 (toll free)
- **The Joint Commission**
  One Renaissance Blvd.
  Oakbrook Terrace, IL 60181
  800-994-6610
  E-mail:complaint@jointcommision.org